# Waxaad heli karta talobixin
# Isniinta  - Jimcaha .9 -14 saac

Danish iyo Ingiriis

T 33 73 51 60

Nambaradan hoos ku qoran waxaad ka heli kartaan talobixin luqada daanishka iyo luqadaha

Bosniska / serbiska / kroatiska

T 33 73 52 33

Carabiga iyo kurdiga (sorani)

T 33 73 52 28

Soomaaliga

33 73 53 11

Urdu iyo Bunjabi

33 73 52 05

Hadii aad doonayso talo bixin gooni ah oo ku saabsan xuquuqdaada la xiriirta ku noqoshada waddankaaga soo buuxi foomka aad ka helayso bogeena internetka

www.asyl.drc.ngo

Ama qoraal waad noogu soo diri kartaa

atvendehjem@drc.ngo

Somali



# DIB U NOQOSHADA 2026

Warbixin ku socota qaxootiga iyo soogalootiga

Kuna saabsan qofka doonaya inuu iskii ugu laabto waddankiisa

DANSK FLYGTNINGE HJÆLP

## HADII AAD KU FAKARAYSO IN AAD DIB UGU LAABATO WADDANKAAGII

Hay'adda gargaarka qaxootigu waxay ku caawinaysaa qaxootiga iyo soogalootiga raba inay ku noqdaan wadankooda(wadan ay hore ugu noolaan jireen ama wadan uu joogo qoyskoodu) talobixin ku saabsan dib u noqoshada. Qaxootiga, soogalootiga iyo dadka haysta laba dhalasho ( ta danishka iyo tu kale) waa u suurto gal inay helaan caawimo dhaqaale. Inad caawimo heshaa waxay ku xidhan tahay goorta aad Danmark timid iyo nooca uu yahay sharciga aad haysataa.

## KAALMADA DHAQAALE

2026 waxaa uu qofka wayni heleyaa 168.258 kr. si uu nolol cusub uga bilawdo wadinkiisa. Caruurtu waxay helayaan 51.317 kr. ilmihiiba.

Lacagta waxaa la bixinayaa 2 qaybood - qaybta u horaysa waxaa labixinayaa marka uu qofku dhoofayo (67.302 kr. qofka wayn, ilmahana 20.527 kr.) qaybta labaad (100.956 kr. qofka wayn, ilmahana 30.790 kr.) waxaa la bixinayaa sanad ka dib markii uu qofku deganaa wadankiisa.

## KAALMOOOYINKA KALE EE UU QOFKU HELAYO

- Kharashka tigidhka
- Kharashka rarka alaabataada ama inaad dalbato lacag aad adigu alaab guri ku gadato.
- Qalab meheradeed iyo in qalab shaqo laguu raro.
- Caymis caafimaad/ kharasha daawaynta 4 sano ah
- Daawada aad isticmaasho 1 sano
- Qalab aad caafimaad ahaan u isticmaasho
- Kharashka iskuulka 4 sanno caruurta jirta 5-16 sano
- Kharashka waraaqaha/Baasaboorka aad ku dhoofaysid

DANSK FLYGTNINGE HJÆLP

## HADII 55 SANO AAD BUUXISAY

Hadii ugu yaraan jirto 55 sano oo aad rabto in aad ku noqoto wadankaagii, waxaad leedahay Kaalmo joogta ah oo ay Danmark bil walba ku siinayso.

Kaalmadaasu caadiyan waxay u dhaxaysaa 2.800 iyo 3.600 kr. bil walba. Si aad taas u hesho waa inaad Danmark ugu yaraan 5 sano sharci ku leedahay.

## XAQ U LAHAANSHAHA SOO NOQOSHADA

**Dadka qaxootiga ah** xaq ayay u leeyihiin in ay ka noqdaan go`aanka noqoshada oo ay ku soo noqdaan Danmark 1 sano gudeheed.Taas oo micneheeda tahay soo cesashada degenashaha aad Danmark hore ugu lahayd. Hadii aad dalbato inaad go’aankaaga ka noqoto ood dalka Danmark ku soo noqoto, waa in aad dib usoo celisaa kaalmadii lagu siiyay oo dhan.

**Dadka Soogalaytiga ah** xaq uma laha in ay ka noqdaan go`aanka noqoshada mar hadii ay ka dhoofaan Danmark oo ay qaataan kaalmada ku noqoshada wadankooda. Taas maceneheeda waxay tahay in ay waayayaan xaquuqdii ay Danmark ku lahaayeen oo aynan Danmark dib ugu soo noqon doonin.

**Dadka haysta labada dhalasho** waa in aad qayb ahaan celisid baasaboorka daanishka ah intaanad dhoofin. Waxa kuu suurto gal ah in aad ka noqotid go’aanka aad baasaboorka ku celinaysid mudo labo sano gudohood. Haddii aad ka laabato dib unoqoshada, waa in aad dib u soo celisaa kaalmadii lagu siiyay oo dhan.

## HADAAD DOONAYSO FAAHFAAHIN DHEERAD AH

Hadii aad ku fakarayso inaad wadankaagii ku noqoto, waxaad noo soo diri kartaa foomka warbixintaada, kaas oo aad ka helayso bogeena internetka (webside keena), wada hadal gaar ah oo aan kula yeelano waxaan kuugu faahfaahin doonaa fursadaha iyo xuuquuda aad leedahay si aad u gaadho go`aanka kugu haboon. Waxaan ku dadaalaynaa in laguu qabto turjumaan hadii aad ubaahantahay.